



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kalfadhiga 3-aad
Documentig Kol/3-aad F.7-aad**

28/09/2013

Kalfadhiga 3-aad

Kulankiisa 7-aad -saacadda 11:20,saacadda 12:35gd.

Guntinta :157

Ajendaha:

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
- 2. Ansixinta Ajendaha**
- 3. Go'aanka Golaha shacabka ee la xariira weerarkii 21 september 2013 loo geystey Seyladda West Gate Nairobi.**
- 4. Warbixinta Deegaanada**
 - a- Hiiraan (Xil. Daahir Xasan Cabdi)**
 - b- Gedo (Xil. Cusmaan Libaax)**
- 5. Warbixintii Shirkaa Hiigsi Qaran 2016(Xil. Khaalid)**
- 6. Ka doodad habka loo maamulaayo sanduuqa gaarka ah ee Baaralamaanka .**

Shir-guddoonka Guddoomiye K/xigeenka 1-aad Mudane Jeylaani Nuur Iikar.

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha K/xigeenka 1-aad ee Golaha Mudane Jeylaani Nuur Iikar waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna Akhriyay Xil.Sheekh Shaacir.

Kadib Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in la ansaxiyo Ajendaha Xildhibaana-dana wey ansaxiyeen.

Intaa kadib ,Guddoomiyaha ayaa u yeeray Xil. Daahir si uu Golaha ugu hor akhriyo Warbixintii Gobolka Hiiraan.

- Xil. Daahir wuxuuna halkaa ka akhriyey warbixin kooban oo ku saabsan buuqashadii uu ku tagay Gobolka Hiraan.

Waxay halkaas ku soo arkeyn in ay jirto Baahi la xariirta Xagga Nolosha sida Caafi-maadka ,waxbarashada iyo Nolosha aasaasiga.waxay kaloo halkaa kula kulmeyn Maamulka Gobolka ,Odayaasha ,Culumaa'udiinka , Indheer-garadka,Haweynka iyo Dhallinyarada.

Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Xil.Cusmaan Libaax, si uu halkaa ugu soo jeediyo Safarkii uu ku tagay Gobolka Gedo iyo Degmooyinkeeda oo kala ah Luuq , Doolow, Iyo Ceel waaq.

- Xil.Cusmaan Libaax wuxuu halkaa ka soo jeediyey Safarkii uu ku tagay Gobolka Gedo iyo Degmooyinka kala ah : Luuq , Doolow,iyo Ceel-waaq. Wuxuuna ku soo bandhigay Safarkiisa Maqal iyo Muuqaal, wuxuuna sheegay in ay baahiweyn u qabaan dadka Deegaanka: Iskuul ,Caafimaad,Beeraha , Jidadka , Ceelasha iyo in la dheelitiro Baahida Ciidamada halkaa jooga.

Guddoomiyaha wuxuu ka Hadley weerakii 21 september ee lagu qaadey Dalka Kenya ee Nairobi oo loo geystey Seyladda West-Gate ,wuxuu sheegay in Ummadda Soomaaliyeed ay aad ugu xuntahay weerarkaas ee lagu laayey dad waxba aan galabsan. Guddoomiyaha wuxuu u diray Tacsii Dawladda Shacabka iyo dadka ku geeriyooday iyo kuwii ku dhaawacmay Weerarkaas, wuuna cambaareeyey.

Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Xil. Khaalid si uu halkaa ugu akhriyo Warbixintii shirkii Hiigsi Qaran ee lagu qabtay Magaaladda Muqdisho.

- Xil. Khaalid markuu soo istaageyn inta uusan akhrin warbixintiisa waxaa halkaas dood ka keenay Xildhibaanada Baarlamanka waxayna diideyn soona jeediyeen in Golaha Shaqo uusan ku lahayn arinta Heegsiga. Guddoomiyaha wuxuu u sheegay Golaha in ay Ansixiyeen Ajendaha haddana ay diideyn ,kadib wuxuu Guddoomiyaha soo jeediyey in laga saaro Agendaha Hiigsi -Qaran 2016. Waana laga saarey.
- Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in la diyaariyo Xildhibaanadii ka doodi lahaa Habka loo maamulaayo Santuuqa Gaarka ee Baarlamaanka.
- Xil. Shariif Maxamed Cabdalla-wuxuu soo jeediyey in Bishii Xildhibaan kasto uu iska jaro \$50(KontonDollar), wuxuu intaa ku daray in ay ku filantahay Culeysbadanna aysan lahayn.
- Xil . Jaamac Wuxuu sheegay in Baarlamaanka ay Ceeb ku tahay in loo uruuriyo Hagbad ama Ayuuto,Xukuumadda waxay awoodikartaa in ay ka bixiso wixii kharash ah Baarlaamanka hadduu Dhib yimaado.
- Xil. Cabdiraxmaan Suge. Wuxuu sheegay in Xildhibaanada horey u ogolaadeyn in ay Mushahaarkooda Bil Walba kajaraan \$100 Doolar .

- Xil. Cabdullaahi wuxuu soo jeediyey in la sameeyo sidey wax ku hagaagikaraan .wuxuu intaa ku daray in xukuumadda waxba aysan siineyn laakiin

Wixii xasaanadda Xildhibaanada way ogoshahay,wuxuuna soo jeediyey in Bilwalba layska jaro \$50(Konton Doollar).

- Xil. Sareedo ,Xil. Caasha Koos iyo Xil. Saado Cali waxay fikrad ahaan isku raacsanaayeen in Bil walba Xildhibaanada iskajaraan \$50(Konton Dollar).

- Xildhibaanada Kala ah – Xil Yacquub,Xil. Ciise wehliye ,Xil. Cilmi Boqore,Xil. Cali Ganey iyo Xil .Cali aadan Waxay kawada sinnaayeen in aysan ogoleyn in lacagta Xildhibaanada layska uruuriyo taas oo keenikarta Culeys .

- Xil.Ruush iyo Xil. Taaw iyo Xil .Maxamed Amiin iyagana waxay isaga mid ahaayeen Fikradda ah in la sameeyo Lacag Uruurinta Xildhibaanada.

- Xil. Cabdiladhiif Sanyare, wuxuu soo jeediyey in lacag uruurinta Xildhibaanada keliya aysan noqon Shaqaalaha Baarlamankana lagu daro.

Guddoomiyaha wuxuu soo Jeediyey in Xildhibaanada Baarlamanka ay yeeshaan Keyd waa arin Muhiim ah layskana jaro Lacag Bilwalba, loona sameeyaa Guddi Maamula.

Shir-guddoonka Guddoomiye K/X.1-aad Mudane Jeylaani Nuur Ikar Uu shir gudoomiinaayey Kal. 3-aad Kul. 7-aad uu sheegay in uu xiran yahay Shirka Saacaddu markey ahayd.12:35gd